Public Health Agency

# Tallaalka loogu talagalay dhallaanka

## ilaa hal sano jir ah



immunisation
the safest way to protect your child

Laga bilaabo 2026

# Hordhac

Hagahan waxaa loogu talagalay waalidiinta haysta dhallaan ilaa hal sano jir ah. Wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan tallaallada caadiga ah ee la siiyo dhallaanka si looga ilaaliyo cudurrada halista ah ee ku dhaca xilliga carruurnimada. Wuxuu sidoo kale sharraxayaa cudurradan iyo sababta carruurtu ugu baahan yihiin ilaalin/difaac ka dhan ah cudurradan.

Barnaamijka tallaal-bixinta waxaa dib-u-eegis loogu sameeyaa si joogto ah si loo xaqiijiyo in carruurta la siiyo ilaalinta/difaaca ugu waxtarka badan ee ka hortagga cudurrada laga hortagi karo. Buug-yarahan waxaa ku jira macluumaad ku saabsan tallaallada la bixiyo marka ilmahaaga uu jiro 8, 12 iyo 16 toddobaad.

i

Ka dib labada qiyaasood ee ugu horreeya ee tallaalka MenB marka ilmaha uu jiro 8 iyo 12 toddobaad, waa muhiim inaad ilmahaaga siiso barastamoolka loogu talagalay dhallaanka. **Xaqiiji in guriga uu kuu yaalo barastamoolka loogu talagalay dhallaanka ka hor intaadan ilmahaaga u qaadin tallaalladan.** (Fiiri boggaga 14-17)

“Labada waxqabad ee caafimaadka dadweynaha ee saameynta ugu weyn ku yeeshay caafimaadka adduunka waa **biyo nadiif ah iyo tallaalada**.”

**Ururka Caafimaadka Adduunka (World Health Organization)**



## Waa maxay tallaal bixinta?

Tallaal bixinta waa habka ugu wanaagsan uguna badbaadada badan ee looga ilaalin karo ilmahaaga inuu ku bukoodo cudurro kala duwan oo faafa. Marka nalaga tallaalo cudur, jirkeena wuxuu diyaar u noqdaa inuu bilaabo la dagaallanka cudurka haddii aan la kulanno cudurkaas.

## Sidee tallaalladu u shaqeeyaan?

Tallaalada waxaa ku jira qayb yar oo ka mid ah bakteeriyada ama fayraska sababa cudurka, ama xaddi yar oo ah kiimikooyinka ay bakteeriyadu soo saarto. Tallaaladu waxay u shaqeeyaan qaab ah inay sababaan in habdhiska difaaca jirka uu samaysto unugyada difaaca jirka (walxaha la dagaallama caabuqa ama cudurka). Haddii ilmahaaga uu la kulmo cudur faafa, unugyada difaaca jirka ee uu soo saaray tallaalka ayaa waxay aqoonsan doonaan cudurkaas diyaarna u noqon doonaan inay jirka ka difaacaan.

## Waa maxay sababta aan ugu baahanahay tallaal qaadashada?

Adduunka oo dhan, malaayiin qof ayaa sannad walba u dhinta cudurrada faafa. Dhimashooyinkan badankood waxaa lagaga hortagi karaa tallaal qaadashada. Inta badan cudurradan waxay noqdeen kuwo aad naadir ugu ah Waqooyiga Ireland, waxaana laga yaabaa inaadan wax badan ka maqlin. Waxay noqdeen kuwo dhif ah sababtoo ah waxaan horey u samaynay heerar aad u sarreeya oo qaadashada tallaalka ah, tallaalladuna waxay shaqo fiican ka qabteen ka takhalusidda cudurrada. Si kastaba ha ahaatee, weli waxay ku badan yihiin qaybaha kale ee adduunka, iyadoo ay sii kordhayaan safarada lagu aado waddamada shisheeye, waxaa laga yaabaa in cuduradaas dib loogu soo celiyo Waqooyiga Ireland waxaana laga yaabaa inay saameeyaan carruurta aan la tallaalin.

Waa muhiim inaanan ilaawin sida ay cudurradani halis u yihiin. Ilmaha yaryar ayaa ah kuwa aad ugu nugul caabuqyadan, waana sababta ay ugu baahan yihiin in laga difaaco sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Waxaa loo baahan doonaa in la qaato tiro tallaallo ah si ilmahaaga ay si buuxda u helaan difaac, sidaas darteed waa muhiim inay la dhammaystirto taxanka tallaalka. Haddii ilmahaaga uu seego mid ka mid ah tallaalladan, wali waa laga gaarsiin karaa inta badan, xitaa haddii uu jiray faraq aad u dheer. Kaliya weydii dhakhtarkaaga ama booqdaha caafimaadka inuu qabanqaabiyo in la siiyo dooska/qiyaasta uu seegay. Khasab ma ahan inay bilowga dib uga soo bilaabaan qaadashada tallaalka.

Cudurrada qaar ayaa u badan inay halis ku noqdaan carruurta waaweyn – sidaas darteed waa muhiim inaad xaqiijiso inay helaan dhammaan qiyaasaha tallaalkooda.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan tallaal qaadashada, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa pha.site/vaccinations ama www.nidirect.gov.uk/childhood-immunisation

Si aad u hesho wixii macluumaadka bukaanka ah ee ku saabsan mid ka mid ah tallaallada la xusay, booqo www.medicines.org.uk oo raadi tallaalka.

# Tallaallada loogu talagalay carruurta

## Tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB (6-in-1)

Tallaalkani wuxuu ilmaha ka difaacayaa 6 cudur oo kala duwan: gowracatada (D), teetanada (T), xiiqdheerta (P; xiiqdheer), cudurka dabaysha (Tallaalka Cudurka Dabaysha Ee Aan Firfircoonayn - IPV), Haemophilus influenzae nooca b (Hib) iyo gacaarshowga B (HepB).

**Ilmahaaga waa inuu qaataa tallaalka 6-isugu-jira-1 marka uu jiro 8, 12 iyo 16 toddobaad.**

Laga bilaabo 2026, ilmahaaga waxaa la siin doonaa tallaal dheeraad ah oo ah 6 tallaal oo la isugu geeyay 1 marka la gaaro ballan cusub markuu ilmaha jiro 18 bilood. Tallaalkan waxaa loogu talagalay inuu bixiyo xoojinta Hib marka ilmaha uu ka sara maro da'da hal sano, si loogu beddelo tallaalka Hib/MenC ee hore u jiray, kaas oo la joojiyay. Kadibna waxay qaadan doonaan qiyaas dheeraad ah oo ka dhan ah gowracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo cudurka dabaysha ka hor inta aysan bilaabin dugsiga. Waxay qaadan doonaan qiyaas dheeraad ah oo ah teetanada, gowracatada iyo cudurka dabaysha inta u dhaxaysa da'da 14 iyo 18.

### Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka 6-in-1?

Daraasadaha waxay muujiyeen in tallaalka 6-in-1 uu aad waxtar ugu leeyahay ka difaacida ilmahaaga ee lixdan cudur ee halista ah. Si kastaba ha ahaatee, qiyaasaha dheeraadka ah ee kor ku xusan ayaa loo baahan yahay si loo kordhiyo difaaca inta ilmahaaga uu sii korayo.

### Waa maxay cudurrada tallaalka 6-in-1 uu ka hortagi doono?

Gawracatada

Gawracatada waa cudur halis ah oo si dhakhso ah u sababi kara dhibaatooyin neefsasho. Cudurkaas wuxuu dhaawici karaa wadnaha iyo habdhiska neerfaha, xaaladaha aadka u darana, wuxuu sababi karaa dhimasho. Kahor inta aan la soo bandhigin tallaalka gawracatada, waxaa jiray ilaa 1,500 oo kiis oo cudurka gawracatada ah sannad kasta ee gudaha Waqooyiga Ireland.

Teetanada

Teetanada waa cudur xanuun badan oo saameeya muruqyada wuxuuna sababi karaa dhibaatooyin neefsasho. Wuxuu saameeyaa habdhiska neerfaha wuxuuna sababi karaa dhimasho. Teetanada wuxuu yimaadaa marka jeermiska laga helo ciidda iyo digada ay galaan jirka iyagoo u maraya meelaha uu jirka ka jeexan yahay ama ka gubsan yahay. Uma kala gudbi karo qof-ka-qof laakiin had iyo jeer wuxuu ku dhex jiraa ciidda, xitaa gudaha waddankan.



Xiiqdheerta (xiiqdheer)

Xiiq-dheerta waa cudur sababi kara qufac dheer iyo ku dhegida neefta oo adkeyn karta neefsashada. Cudurka wuxuu socon karaa ilaa 10 toddobaad. Wuxuu noqon karaa mid aad halis ugu ah carruurta yaryar wuxuu xitaa dili karaa carruurta ka yar hal sano jir. Ogeysiisyada Cudurka Xiiqdheerta ee Waqooyiga Ireland waxay kordheen intii u dhaxaysay Janaayo 2024 iyo Meey 2024. Waxaa jiray in ka badan 3,000 oo kiis oo xiiqdheer ah oo la xaqiijiyay oo la soo sheegay sannadkii 2024. Kororkaan dhawaantan ku yimid kiisaska cudurka ayaa muujinaya sida ay muhiim u tahay in la xaqiijiyo in ilmahaaga uu qaato dhammaan tallaallada loo qorsheeyay.

Cudurka dabaysha

Cudurka dabaysha waa fayras weerara habdhiska neerfaha wuxuuna curyaamin karaa muruqyada. Haddii uu saameeyo muruqyada laabta ama maskaxda, cudurka dabaysha wuxuu sababi karaa dhimasho. Kahor inta aan la soo bandhigin tallaalka cudurka dabaysha, ilaa 1,500 oo kiis oo curyaannimo ah oo uu sababay cudurka dabaysha ayaa sannad walba ka dhacayay Waqooyiga Ireland.

Hib

Hib waa caabuq keeni kara tiro cuduro waaweyn ah sida sumowga dhiigga, oof-wareenka iyo caabuqa maskaxda. Dhammaan cudurradan waxay sababi karaan dhimasho haddii aan si dhakhso ah loo daweyn. Tallaalka Hib wuxuu ilmahaaga ka difaacayaa hal nooc oo ah caabuqa maskaxda (Hib). Kama difaaco nooc kasta oo kale oo meningitis (caabuqa maskaxda) ah.

Cagaarshowga B

Cagaarshowga B waa caabuq ku dhaca beerka waxaana sababa fayraska ‘hepatitis B’. Carruurta markuu ku dhaco, cudurka wuxuu sii jiri karaa sannado badan wuxuuna mararka qaarkood sababi karaa dhibaatooyin sida nabar ka yeelashada beerka (cirrhosis), taas oo ka hor istaagaysa beerka inuu si habboon u shaqeeyo, ama wuxuu sababi karaa kansarka beerka.

In kasta oo tirada carruurta uu ku dhacay fayraska cagaarshowga B ay aad ugu yar tahay gudaha UK, haddana tallaalka cagaarshowga B waxaa la siiyay dhallaanka khatarta sare ugu jira inay caabuqa ka qaadaan hooyooyinkooda cudurka qaba tan iyo 1980-meeyadii. Bishii Oktoobar 2017, tallaalka cagaarshowga B ayaa lagu daray barnaamijka tallaalada caadiga ah si dhammaan carruurta ay uga faa'iidaystaan difaac ka helida fayraskan.

Tallaalka cagaarshowga B wuxuu dadka ka difaacaa oo keliya nooca B ee fayraska, qaadashada 4 qiyaasood oo tallaalka ah ayaa waxay carruurtaas siin doontaa difaac waara iyada oo aan lagala kulmayn arrimo khatar dheeraad ah keenaya.



### Waxyeellooyinka gaarka ah ee tallaalka 6-in-1

Inta badan dhallaanka ma yeelan doonaan wax waxyeellooyin gaar ah, laakiin dhammaan dhallaanka way kala duwan yihiin. Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu la kulmo qaar ka mid ah waxyeellooyinka gaarka ah ee soo socda, kuwaas oo badanaa khafiif ah:

- cuncun ilaa 48 saacadood soconaya ka dib marka la duro;
- qandho khafiif ah (daaweynta heerkulka sareeya ka dib qaadashada tallaalka ka eeg bogga 16);
- buro yar oo ka soo baxda meeshii lagaga duray tallaalka. Tani waxay socon kartaa dhowr toddobaad waxayna u baabi'i doontaa si tartiib ah.

Haddii aad u malaynayso in ilmahaaga uu falcelin kale kala kulmay tallaalka 6-in-1 oo aad ka walaacsan tahay, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.

### Ma jiraan sababo ay tahay in ilmahayga uusan qaadan tallaalka 6-in-1?

Waxaa jira sababo aad u tiro yar oo aan carruurta loo tallaali karin. Tallaallada lama siin karo carruurta qaba falcelin xasaasiyadeed (xasaasiyad daran) oo la xaqiijiyay oo ka dhan ah qiyaas hore oo tallaalka ah ama qayb/maado ku jirta tallaalka. Tallaallada gawracatada, teetanada iyo cudurka dabaysha (DTP), waxaa ku jiri kara maadooyinka neomycin, streptomycin ama polymixin B (oo ah antibiyootig laga yaabo in xaddi yar loogu soo daro tallaallada).

#### Falcelinada Xasaasiyadeed

Si aad dhif u ah, tallaal ayaa waxaa laga yaabaa inuu sababo falcelin xasaasiyadeed, sida finan ama cuncun saameeya qaar ka mid ah ama dhammaan jirka. Xitaa si aad naadir uga sii ah, carruurta waxaa laga yaabaa inay falcelin daran la kulmaan dhowr daqiiqo gudahood ka dib qaadashada tallaalka, taasoo sababi karta neefsashada oo adkaata iyo suurtagalnimo ah inay suuxaan/dhacaan. Taasi waxaa loo yaqaanaa 'anaphylaxis'. Daraasad dhowaan la sameeyay ayaa muujisay in wax ka yar 1 kiis oo 'anaphylaxis' ah laga soo sheego halkii milyan oo tallaal ee la bixiyo. Dadka bixiya tallaallada waxaa loo tababaray inay la tacaalaan falcelinada 'anaphylaxis', daaweyntuna waxay qofka u horseedi doontaa soo kabasho degdeg ah oo buuxda.

#### Qallal

Si aad dhif u ah, carruurta waxaa laga yaabaa inay la kulmaan qallal maalin ama laba ka dib qaadashada tallaalka. Tani waxay badanaa la xiriirtaa yeelashada heerkul aad u sarreeya (fiiri bogga 17). Haddii ilmahaaga uu la kulmo qallal ka dib qaadashada tallaalka, waa inaad raadsataa talo caafimaad oo degdeg ah. Haddii xaruntaada caafimaadka ay xiran tahay ama haddii aadan la xiriiri karin dhakhtarkaaga, si toos ah u tag waaxda gurmadka degdegga ah ee isbitaalka kuugu dhow. Ilmaha yaryar badanaa si dhakhso leh oo dhammaystiran ayay uga soo kabsadaan qallalka.

Ilmaha yaryar waxay la kulmi karaan qallalka wakhti kasta, sidaas darteed inay la kulmaan qallal ka dib markasta oo ay qaataan tallaalkooda khasab ma ahan in lala xiriiriyo tallaalka. Dhakhtarkaaga wuxuu go'aamin doonaa in ilmahaaga uu qaadan karo qiyaaso badan oo tallaalka ah. Dib u dhigista qaadashada tallaalka waxay kordhin kartaa khatarta ah in ilmahaaga uu la kulmo qallal ka dib qaadashada tallaalka (qallalka ka dhasha heerkulka sareeya ayaa ah mid si dhif ah ugu dhaca carruurta ilaa 6 bilood jirka ah). Sidaas darteed waa muhiim inaad xaqiijiso in ilmahaaga la tallaalo da'da saxda ah.



## Rotavirus

Tallaalkani wuxuu ka hortagayaa rotavirus, oo ah caabuq caam ah laakiin halis ah oo ku dhaca xiidmaha hoose.

**Ilmahaaga waa inuu qaataa tallaalka rotavirus marka uu jiro 8 iyo 12 toddobaad.**

### Waa maxay rotavirus?

Rotavirus waa wax caadiyan matag iyo shuban ah ku rida carruurta yaryar. Waxay noqon kartaa arrin halis ah maadaama dhallaanka yaryar ay halis ugu geli karaan fuuq-bax. Ilmaha qaarkood waxay u baahan doonaan daryeel caafimaad oo ay ka helaan isbitaalka.

### Sidee ayuu u faafaa rotavirus?

Rotavirus si fudud ayuu ugu faafaa taabashada tooska ah ee sagxadaha sida alaabta carruurta ay ku ciyaarto, gacmaha ama xafaayadaha wasakhaysan. Wuxuu sidoo kale ku faafi karaa hawada iyadoo la isku marinayo hindhisada iyo qufaca. Dhaqidda gacmaha iyo nadiifinta sagxadaha waxay gacan ka geysan kartaa yareynta faafitaanka fayraska ilaa xad laakiin waligeed si buuxda looma joojin karo faafitaanka.

### Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka rotavirus?

Caddeynta waxay muujinaysaa in habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo in dhallaanka uu ku dhaco rotavirus ay tahay in la siiyo tallaalka. Taasi waa sababta tallaalka rotavirus uu qayb uga yahay jadwalka tallaallada carruurta ee joogtada ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira waxyaabo kale oo sababa matag iyo shuban oo aan tallaalka uusan ka hortagin.

### Goorma ayuu ilmahayga qaadan doonaa tallaalka?

Ilmahaaga waxaa la siin doonaa tallaalka marka uu gaaro 8 toddobaad jir iyo mar labaad marka uu gaaro 12 toddobaad waxaana lala siin doonaa tallaallada kale ee ay qaadanayaan. Ilmahaaga ma bilaabi karo qaadashada tallaalka haddii uu ka weyn yahay 15 toddobaad ama uu qaato qiyaasta labaad ka dib markuu gaari 24 toddobaad jir.

### Waa maxay sababta carruurta waaweyn aysan u qaadan karin tallaalka?

Inta ay sii korayaan, dhallaanka qaar - qiyaastii 1 ka mid ah 1,000kiiba - waxay yeeshaan xaalad caafimaad oo sababta in xannibaad ay ku timaado xiidmaha hoose. Aad bay naadir u tahay ka hor da'ada 12 toddobaad jir, kiisaska intooda badan waxay dhacaan inta u dhaxaysa da'ada shan bilood iyo sanad jir. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira fursad aad u yar (qiyaastii 2 ka mid ah 100,000kii ilmood ee la tallaalo) in qiyaasta ugu horreysa ee tallaalka ay sidoo kale sababi karto xannibaaddan. Si loo yareeyo khatarta ah in tani ay dhacdo, qiyaasta ugu horreysa ee tallaalka lama siin doono carruurta ka weyn 15 toddobaad.



### Sidee loo bixiyaa tallaalka?
Tallaalka rotavirus waxaa loo bixiyaa dareere ahaa iyadoo la isticmaalayo qalabka dhibco bixinta si loo fududeeyo ilmahaaga inuu liqo.

### Ka warran haddii ilmahayga uu soo tufo tallaalka ama uu matago isla markiiba ka dib marka uu qaato?
Tallaalka ayaa mar kale la siin doonaa haddii ilmahaaga uu matago ama uu soo tufo tallaalka.

### Tallaalka ma joojin doonaa carruurta inay xanuunsadaan iyo inay yeeshaan shuban?
Maya. Rotavirus maaha sababta kaliya ee caruurta u keenta xanuunsashada iyo shubanka, sidaa darteed qaar ayaa laga yaabaa inay weli xanuunkooda sii socdo. Si kastaba ha ahaatee, tallaalka wuxuu qiyaas ahaan siddeed ka mid ah tobankii carruur ah ka joojin doonaa inay la kulmaan matagga iyo shubanka uu sababo rotavirus. Hadba tirada ugu badan caruurta ee qaadata tallaalka, ayaa waxaa sii adkaan doonta inuu fayraska faafo.

### Waxyeellooyinka gaarka ah ee tallaalka
Tallaalka waxaa si weyn loogu isticmaalay waddamo kale wuxuuna leeyahay diiwaan badbaado oo wanaagsan. Mararka qaarkood, carruurta qaadatay tallaalka waxaa laga yaabaa inay noqdaan kuwo aan meel fadhiisanayn, xanaaq-dhow ama inay yeeshaan shuban fudud.

Xaalado aad naadir u ah (qiyaastii 2 ka mid ah 100,000 ilmood ee la tallaalay), tallaalka wuxuu saameyn karaa xiidmada hoose ee ilmaha waxaana laga yaabaa inay yeeshaan barar caloosha ah, matag, iyo inay jilbaha soo laabaan oo ay ku dhejiyaan laabtooda sidii inay xanuun dareemayaan oo kale – mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inay saxaroodaan dhiig. Haddii ay taasi dhacdo, waa inaad isla markiiba la xiriirtaa dhakhtarkaaga.

**i**

**Waa muhiim in la xasuusto in khataraha ka dhasha cudurka ay aad uga daran yihiin waxyeellooyinka naadirka ah ee uu sababo tallaalka.**

### Ilmahayga tallaalka ma ka qaadi doonaa fayraska rotavirus?
Maya. Fayraska ku jira tallaalka waa la daciifiyay sidaa darteed ma sababo cudurka oo dhammaystiran. Tallaalka wuxuu ka caawinayaa ilmahaaga inuu yeesho unugyada difaaca jirka, sidaa darteed marka xigta ee uu la kulmo fayraska ma qaadi doono cudurka.

Waxaa dhici karta in fayraska ku jira tallaalka uu ka gudbi karo ilmaha una gudbi karo dadka u dhow iyada oo uu uga gudbayo xafaayadaha wasakhaysan ugu yaraan ilaa 14 maalmood. Si kastaba ha ahaatee, tallaalida ilmaha ayaa waxay ilmaha ka difaaci doonaa qaadista cudurka rotavirus iyo inuu u sii gudbiyo dadka u dhow, xitaa kuwa habdhiska difaaca jirkooda uu daciifka yahay sabab la xiriirta xaalad caafimaad ama daaweyn, waxaana taasi ay ka ahmiyad culus tahay khatar kasta oo suurtagal ah oo ka imaan karta tallaalka.

Dhammaan dadka si dhow ula xiriira/u dhowaada dhallaanka dhawaan la tallaalay waa inay ilaaliyaan nadaafadda shaqsiyeed ee wanaagsan (sida dhaqidda gacmahooda ka dib marka ay xafaayadaha ka beddelaan ilmaha).



## Cudurka Qoorgooyaha

Bakteeriyada ‘Meningococcal’ waxay sababtaa laba nooc oo caabuq ah oo aad u daran: **meningitis** (bararka xuubka maskaxda) iyo **septicaemia** (sumowga dhiigga). Waxaa jira noocyo dhowr ah oo kala duwan oo bakteeriyada ‘meningococcal’ ah, tan ugu badan dalkan waa MenB. Ilmahaaga waxaa la siin doonaa tallaalka MenB markuu jiro 8 iyo 12 toddobaad iyo ka dib sannadguurada dhalashada koowaad.

Waxaan haysanay tallaal aad waxtar u leh oo ka dhan ah MenC dhowrkii sano ee la soo dhaafay iyadoo si fiican ay u qaateen carruurta yaryar iyo dadka waaweyn, sidaas darteed kiisaska caabuqa MenC hadda aad ayay u yar yihiin, sidaa darteed hadda looma baahna in carruurta la siiyo tallaalka MenC. Ilmahaaga wuxuu heli doonaa tallaalka MenACWY marka uu gaaro da’ada fasalka 11aad taas oo qayb ka ah barnaamijka tallaalada dugsiga.

### Waa maxay ‘meningitis’?
Meningitis waa barar ku dhaca xuubka maskaxda. Tani waxay cadaadis ku keenaysaa maskaxda. Meningitis si aad u dhakhso badan ayuu u kori karaa, taasoo sababi karta astaamo daran xitaa waxay qofka u horseedi kartaa dhimasho.

### Waa maxay ‘septicaemia’?
Septicaemia (sumowga dhiigga) waa caabuq halis ah oo nolosha halis geliya oo si dhakhso ah uga sii dara oo khatarta ah inuu sababo dhimasho way ka sarreysaa marka loo eego ‘meningitis’.

Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan waxa ay tahay in lagaga digtoonaado meningitis iyo septicaemia eeg bogga 18.

### Ma la daweyn karaa ‘meningitis’ iyo ‘septicaemia’?
Haa, waa la daawayn karaa, laakiin cuduradani si dhakhso ah ayay u soo shaac baxaan xitaa marka la daaweeyo carruurta qaar ayaa yeesha dhaawac joogto ah qaarna way u dhintaan.

### Ma laga hortagi karaa?
Haa, waxaan si guul leh uga hortagnay caabuqa MenC sannado badan. Tallaal gacan ka gaysanaya ka hortagga cudurka MenB ayaa lagu soo daray barnaamijka tallaalada Waqooyiga Ireland sannadkii 2015.

## Tallaalka MenB

Tallaalkani wuxuu bixiyaa difaac ka dhan ah cudurka MenB, oo ah nooca ugu badan ee cudurka qoorgooyaha. Sannadihii ugu dambeeyay waxaa jiray ilaa 50 kiis oo ah cudurka qoorgooyaha ah sannadkiiba ee gudaha Waqooyiga Ireland, kiisaskaas oo intooda badan uu sabab u ahaa MenB. Dhallaanka iyo carruurta yaryar ayaa ah kuwa ugu badan ee uu saameeyo.

**Ilmahaaga waa inuu qaataa tallaalka MenB markuu jiro 8 iyo 12 toddobaad iyo wax yar ka dib sanadguuradooda dhalashada koowaad.**

### Tallaalka MenB ma leeyahay wax waxyeellooyin gaar ah?

Carruurta qaar ayaa waxaa laga yaabaa inay:

- midab casaan ah, barar ama jilicsanaan ka yeeshaan meesha laga muday/duray (tani si tartiib ah ayay u baaba'aysaa dhowr maalmood gudahood)
- noqdaan kuwo xanaaq badan oo si liidata wax u cuna, ama
- yeeshaan heerkul sareeya (qandho).

i

Qandhadu waa falcelin caam iska ah ka dib qaadashada tallaalka MenB. Ma aha wax laga walwalo. Waxaad uga hortagi kartaa adigoo siinaya ilmahaaga barastamool ka dib qaadashada tallaalka MenB marka uu jiro 8 iyo 12 usbuuc. Eeg boggaga 14–17 si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo sameeyo arrintan. **Waa muhiim inaad xaqiijiso inaad diyaarsato barastamoolka dhalllaanka ka hor intaadan ilmahaaga u kaxayn tallaalkooda ugu horreeya ee MenB.**

### Ma jiraan carruur ay tahay inaysan qaadan tallaalka?

Tallaalka waa in aan la siin carruurta hore ula soo kulmay:

- falcelin xasaasiyadeed oo la xaqiijiyay oo ka dhan ah qiyaas hore oo tallaalka ah (falcelinada xasaasiyadeed ka eeg bogga 6), ama
- falcelin xasaasiyadeed oo la xaqiijiyay oo ka dhan ah mid ka mid ah maaddooyinka tallaalka.

### Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka MenB?

Waxaa jira noocyo badan oo kala duwan oo ah infekshanka MenB, tallaalka wuxuu ka hortagaa intooda badan (qiyaastii saddex meelood meel ka mid ah) laakiin kama hortago dhammaan noocyadaas. Sidaa darteed wuxuu si weyn u yareeyaa fursadda ah inuu ilmahaaga ku qaadi karo caabuqa, laakiin weli waxaa jira fursad aad u yar oo uu ku qaadi karo, sidaa darteed waa muhiim inaad weli taqaano calaamadaha iyo astaamaha ay tahay in laga digtoonaado - fiiri bogga 18.

## Tallaalka 'Pneumococcal' (PCV)

Tallaalkani wuxuu bixiyaa difaac ka dhan ah mid ka mid ah sababaha ugu badan ee keena 'meningitis', iyo sidoo kale xaaladaha kale ee caafimaad sida caabuqyada dhegta ee daran (otitis media) iyo oof-wareenka oo ay sababaan noocyada ugu badan ee bakteeriyada 'pneumococcal'. Cudurka 'Meningitis', caabuqyada dhegaha iyo oofwareenka waxaa sidoo kale sababi kara noocyo kale oo aan caam ahayn oo ah bakteeriyada 'pneumococcal' iyo bakteeriyaal iyo fayrasyo kale. Tallaalkani kama hortagi doono caabuqyadan kale.

**Ilmahaaga waa inuu qaataa tallaalka PCV marka uu jiro 16 toddobaad iyo wax yar ka dib sanadguuradooda dhalashada koowaad.**

### Waa maxay caabuqa 'pneumococcal'?

Cudurka 'pneumococcal' (oo loogu dhawaaqo new-mo-cock-al) waa mid ka mid ah sababaha ugu badan ee keena 'meningitis' laakiin wuxuu sidoo kale sababaa caabuqyada dhegaha ee daran (otitis media), oofwareen iyo cudurro kale.

### Waxyeellooyinka gaarka ah ee PCV

10kii ilmo ee la tallaalo, hal ama laba ka mid ah ayaa laga yaabaa inay yeeshaan barar, casaan noqoshada ama jilicsanaanta goobta la duray ama inay yeeshaan qandho khafiif ah. Si aad dhif u ah, tallaalka wuxuu sababi karaa falcelin xasaasiyadeed (fiiri bogga 6).



# Su'aalaha caamka ah

**Mudo intee le'eg ka dib qaadashada tallaalka ayaan ilmahayga u kaxayn karaa dabaasha (dabaal)?**
Waxaad ilmahaaga u kaxayn kartaa dabaasha wakhti kasta, ka hor iyo ka dib marka ay qaataan tallaalladooda. Si lid ku ah waxa ay dadku aaminsan yihiin, ilmahaaga uma baahna tallaal ka hor inta uusan dabbaal aadin.

**Ma jiraan siyaabo kale oo aan ku xoojin karo difaaca ilmahayga?**
Ma jirto hab kale oo la xaqiijiyay oo wax ku ool ah oo lagu xoojiyo difaaca ilmahaaga. Daawo dhaqameed ayaa la isku dayay si loo helo qaab kale oo looga hortago xiiq-dheerta, laakiin ma shaqeyso. Golaha Kulliyadda Daawooyinka Dhaqameed (ururka diiwaangashan ee dhakhaatiirta ku takhasusay daawooyinka dhaqameed 'homeopathy') wuxuu kula talinayaa waalidiinta inay carruurtooda ku tallaalaan tallaallada caadiga ah.

**In ilmahayga isku mar la siiyo dhowr tallaalo miyaanay culays/cadaadis saarayn hab-dhiska difaaca jirkiisa/jirkeeda?**
Maya. Laga bilaabo xilliga dhalashada, habdhisyada difaaca jirka ee ilmaha waxay ka ilaaliyaan jeermisyada ku hareeraysan. Haddii aanan jirin difaacan, carruurta ma awoodi doonaan inay la tacaalaan tobanaan kun oo bakteeriya iyo fayrasyo ah oo baahsan maqaarkooda, sankooda, cunahooda iyo xiidmahooda. Difaacani wuxuu sii soconayaa inta ay nool yihiin oo dhan.

Aragti ahaan, ilmaha wuxuu si wax ku ool ah uga jawaab celin karaa qiyaastii 10,000 oo tallaal oo uu qaato hal mar. Sidaas darteed habdhiska difaaca jirka ilmaha ayaa si fudud ula qabsan kara tirada tallaallada la siiyo ee jadwalka tallaalada caadiga ah.

Laguma talinayo in tallaallada loo siiyo si gooni gooni ah. Jadwalka hadda jira waxaa loogu talagalay inuu siiyo ilmahaaga difaaca ugu fiican ee ka dhanka ah cudurrada marka la gaaro da'aha gaarka ah ee ay halista ugu badan ku jiri karaan. Gooni gooni u kala siinta tallaallada waxay ilmahaaga gelin kartaa khatar mana jirto faa'iido laga helo marka la eego walwalka ama badbaadada marka loo barbar dhigo in tallaallo badan la wada qaato hal mar.



**Ilmahayga waa dhicis oo wuxuu dhashay goor hore. Goorma ayay tahay in dhallaanka dhicisoobay ay qaataan tallaalkooda ugu horreeya?**
Ilmaha dhicisoobay waxay halis weyn ugu jiraan caabuq. Waa in la tallaalaa iyadoo la raacayo jadwalka tallaalka ee lagu taliyay laga bilaabo da'ada 8 toddobaad ka dib dhalashada, iyadoon loo eegin muddada ay dhicisoobeen.

**Waxaan ka walwalsanahay in ilmahayga uu ka xanaaqi doono ku duritaanka cirbadda.**
Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu ooyo oo uu xanaaqo ilaa dhowr daqiiqo, laakiin badanaa way xasilli doonaan ka dib marka la koolkooliyo/hab la siiyo.

**Waxaan ka walwalsanahay in ilmahayga uu qabo xasaasiyad. Ma qaadan karaan tallaallada?**
Haa. Cudurka neefta, cambaarta, qandhada xasaasiyadda, u dulqaadasho la'aanta cuntada iyo xasaasiyadaha kama hor istaagayaan ilmahaaga inuu qaato tallaal ku jira barnaamijka tallaalada carruurnimada. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.

**Ma jiraan sababo ay tahay in ilmahayga aan la tallaalin?**
Waxaa jira sababo aad u yar oo ay tahay in ilmaha aan la tallaalin. Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka haddii ilmahaaga:

- uu qabo heerkul aad u sarreeya ama qandho, matag ama shuban maalinta ballanta;
- uu falcelin taban kala kulmay wax tallaal ah;
- uu xasaasiyad daran ka qabo wax uun;
- uu qabo xaalad caafimaad oo dhiigbax ah;
- uu la kulmay qallal ama suuxdin;
- uu soo maray ama hadda marayo daaweynta kansarka;
- uu la soo kulmay cudur saameeya habdhiska difaaca jirka (tusaale ahaan, kansarka dhiigga, HIV ama AIDS);
- uu qaadanayo wax daawo ah oo saameysa habdhiska difaaca jirka (tusaale ahaan, steroids-ka dooska sareeya leh ama daawaynta la bixiyo ka dib marka qofka lagu beero xubin ama daawaynta loogu talagalay kansarka);
- uu qabo cudur kale oo halis ah.

Kuwaas had iyo jeer macnaheedu maaha in ilmahaaga aan la tallaali karin, laakiin waxay ka caawinayaan dhakhtarka ama kalkaalisada inay go'aamiyaan tallaalada ugu fiican ee uu qaadan karo ilmahaaga iyo haddii ay u baahan yihiin inay ku siiyaan talooyin kale. Taariikhda xanuunada qoyska marnaba sabab uma aha in ilmaha aan la tallaali karin.

**Waa maxay sababta barnaamijka tallaalada uu isu beddelo marba mar?**
Barnaamijyada tallaalada si joogto ah ayaa dib-u-eegis loogu sameeyaa si loo xaqiijiyo in dhammaan carruurta la siiyo difaaca ugu fiican ee ka hortagga cudurrada laga hortagi karo. Marka tallaallo cusub la helo, ama cilmi-baarista ay muujiso in tallaallada markaas jira la bixiyo waqtiyo kala duwan ay wanaajinayso difaaca, barnaamijka ayaa la beddeli doonaa.

I ISKAAN GAREEY

**Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxay soo sheegi karaan waxyeellooyinka gaarka ah ee laga shakisan yahay ee tallaallada iyo daawooyinka iyagoo isticmaalaya Yellow Card Scheme.**

Waxaa sidaas la samayn karaa iyadoo la booqanayo **mhra.yellowcard.gov.uk** ama khadka taleefanka Yellow Card laga wacayo **0800 731 6789**. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa lambarka QR ama adigoo soo dejisanaya abka Yellow Card.

**Sideen uga hortagi karaa sare u kaca heerkulka ka dib qaadashada tallaalka MenB?**
Carruurta qaar ayaa laga yaabaa inay yeeshaan heerkul sareeya ama qandho (ka badan 37.5°C) ka dib marka la tallaalo. Arrintani waa mid caam ah ka dib qaadashada tallaalka MenB. Si looga hortago arrintan waxaa lagu talinayaa in carruurta la siiyo saddex qiyaasood oo barastamoolka dhallaanka ah ka dib qaadashada mid kasta oo ka mid ah tallaalladooda MenB marka ay jiraan 8 iyo 12 toddobaad. Siismada barastamoolka waxay yareyn doontaa khatarta qandhada, xanaaqa iyo raaxo-darrada guud (oo ay ka mid tahay xanuunka laga dareemayo goobta laga duray) ka dib qaadashada tallaalka MenB. **Waa muhiim inaad xaqiijiso inaad guriga ku diyaarsato barastamoolka dhallaanka ka hor inta uusan ilmahaaga qaadan tallaalkooda ugu horreeya.** Haddii ilmahaaga uu qabo qandho ka dib qaadashada tallaalka 16 toddobaad, waxaad sidoo kale siin kartaa barastamool.

**Xaggeen ka heli karaa barastamoolka dhallaanka?**
Barastamoolka dareeraha ah waxaa laga heli karaa farmashiyaasha iyo dukaamada waaweyn. Waxaad iibsan kartaa nooc gaar ah (badanaa qiimo jaban) ama nooc kale sida Calpol®. Ma aha wax muhiim ah nooca aad doorato inaad siiso laakiin waa muhiim inaad xaqiijiso inaad ilmahaaga siiso cabbirka saxda ah (carruurta 8 iyo 12 toddobaad jira cabbirkooda saxda ah waa 120mg/5ml).

**Goorma ayaan ilmahayga siiyaa barastamoolka?**
Waa inaad qiyaasta koowaad siisaa xilliga ama sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka dib qaadashada tallaalka. Kadib qiyaasta labaad sii 4 ilaa 6 saacadood ka dib qiyaasta koowaad, iyo qiyaasta saddexaadna sii afar ilaa lix saacadood ka dib qiyaasta labaad. Ha siin qiyaasta koowaad ka hor booqashada tallaal qaadashada, sababtoo ah kalkaalisadaada marka hore waxay u baahan doontaa inay xaqiijiso in ilmahaaga uusan lahayn astaamo caabuq, taasoo mararka qaarkood noqon karta sabab dib loogu dhigo qaadashada tallaalladaada.

**Wax intee le'eg ayaan siiyaa?**
Qiyaas kasta waa 2.5ml. Dhalada aad iibsanayso waa inay lahaataa irbad ama qaado lagu cabbiro qiyaasta saxda ah (hoos ka eeg).

**Qiyaasta iyo waqtiga la siinayo barastamoolka dhallaanka ee loogu talagalay in la isticmaalo ka dib qaadashada tallaalka ee da'ada 8 iyo 12 toddobaad.**

| Da'da ilmaha | Qiyaasta 1aad | Qiyaasta 2aad | Qiyaasta 3aad |
|---|---|---|---|
| **8 toddobaad** | Hal 2.5ml xilliga ama sida ugu dhakhsaha badan ka dib qaadashada tallaalka | Hal 2.5ml 4 ilaa 6 saacadood ka dib qaadashada qiyaasta 1aad | Hal 2.5ml 4 ilaa 6 saacadood ka dib qaadashada qiyaasta 2aad |
| **12 toddobaad** | Hal 2.5ml xilliga ama sida ugu dhakhsaha badan ka dib qaadashada tallaalka | Hal 2.5ml 4 ilaa 6 saacadood ka dib qaadashada qiyaasta 1aad | Hal 2.5ml 4 ilaa 6 saacadood ka dib qaadashada qiyaasta 2aad |

**Fiiro gaar ah:** **Carruurta dhiciska ah, qiyaasta waa in la xisaabiyaa iyadoo loo eegayo miisaanka ilmaha wakhtiga tallaal qaadashada.**

**Waa muhiim in ilmahaaga uu qaato saddexda qiyaasood ee barastamoolka ah ee lagu taliyay ka dib qaadashada mid kasta oo ka mid ah labada tallaal ee MenB ee ugu horreeyay si loo yareeyo fursada ah in ilmaha uu yeesho qandho.**

Haddii ilmahaaga uu soo tufo in ka badan kala bar barastamoolka dhowr daqiiqo gudahood marka uu qaato, markaas waxaad isla markiiba siin kartaa isla cabbirka barastamoolka aad hore u siisay.

**Ma ammaan baa in barastamool la siiyo ilmaha yar ee noocaas ah?**
Haa, barastamoolka waxaa si ammaan ah loo siin karaa carruurta 8 toddobaad jirka ah. Khubarada* waxay ku taliyeen in ka dib tallaallada la siiyo 8 toddobaad jirka, ay ammaan tahay in la siiyo barastamool ilaa 48 saacadood (iyadoo ugu yaraan afar saacadood loo dhaxaysiinayo qiyaasaha iyo iyada oo aan la siinayn wax ka badan afar qiyaasood maalin kasta).

Taasi waxaa sabab u ah inay aad u badan tahay in qandho kasta oo khafiif ah oo timaada wakhtigan oo kale ka dib qaadashada tallaallada uu sabab u yahay tallaalka, barastamoolkana wuxuu ilmahaaga ka dhigi doonaa mid dareemaya caafimaad. Baakadaha qaar ee barastamoolka ayaa laga yaabaa inay ku qoran yihiin talooyin kala duwan laakiin baakadaha cusub ayaa lagu cusbooneysiiyay talooyinkan ay tahay in la raaco.

*Talooyinka khubarada ee Guddiga Wadajirka ah ee iyo Guddiga Daawooyinka Aadanaha.

**Ka waran haddii ilmahayga uu weli qabo qandho ka dib markii uu qaatay saddexda qiyaasood ee barastamoolka?**

Carruurta qaar ayaa laga yaabaa inay weli yeeshaan qandho ka dib qaadashada tallaalka, xitaa ka dib marka ay qaataan barastamoolka. Haddii ilmahaaga uu weli qabo qandho ka dib qaadashada saddexda qiyaasood ee ugu horreeya ee barastamoolka laakiin sidiisa kale uu iska fiican yahay, waxaad sii wadi kartaa inaad siiso barastamoolka ilaa 48 saacadood ka dib qaadashada tallaalka. Waa inaad had iyo jeer u dhaxaysiisaa ugu yaraan afar saacadood siismada qiyaasaha oo waligaa ha siin wax ka badan afar qiyaasood maalintii. Sidoo kale waa inaad ilmahaaga qaboojisaa adigoo xaqiijinaya inaysan xirnayn/saarnayn lakabyo badan oo dhar ah ama bustayaal badan, iyo inaad siiso dareere badan.

**Haddii aad ka walaacsan tahay ilmahaaga wakhtiguu doono ha ahaadee, ku kalsoonow dareenkaaga oo la hadal dhakhtarkaaga.**

**Haddii 48 saacadood ka dib qaadashada tallaalka ilmahaagu uu weli qabo qandho, ama aad ka walwalsan tahay inay xanuunsan yihiin, waa inaad la hadasho dhakhtarkaaga si aad talo uga hesho.**

**Aqoonsiga iyo daaweynta qandhada**

Haddii wejiga ilmahaaga uu yahay kulayl marka la taabto oo uu u muuqdo casaan, waxay u badan tahay inay qabaan qandho. Waxaad heerkulkiisa ku hubin kartaa heerkulbeeg (qandho ayaa ka sareysa 37.5°C).

Qandhada waa wax caadi ah oo ku dhaca dhallaanka iyo carruurta. Badanaa waxay ku dhacdaa markay qabaan caabuqyo. Mararka qaarkood qandhada waxay sababi kartaa in ilmaha uu qallalo. Qandho kasta ayaa sababi kartaa arrintaas, hadday qandhadu tahay mid uu sababay caabuq ama tallaal. Sidaas darteed waa muhiim inaad ogaato waxa la sameeyo haddii ilmahaaga uu yeesho qandho. Xusuusnow, qandhada waxay u badan tahay inay ka timaado cudurrada marka loo barbardhigo tallaallada.

**Sida loo daweeyo qandhada**

1. Ilmahaaga qabooji adigoo xaqiijinaya:
   - inaysan u xirnayn/saarnayn lakabyo badan oo dhar ah ama bustayaal;
   - qolka ay ku jiraan uusan ahayn mid aad u kulul (waa inuusan qabow ahayn sidoo kale, waa inuu ahaadaa mid raaxo ah - qiyaastii 16–20°C).
2. Sii dareere badan.
3. Sii barastamoolka dhallaanka (codso midka aan sonkorta lahayn). Marka ilmahaaga uu qaato tallaalka MenB oo qayb ka ah tallaallada ilmaha la siiyo da'ada 8 iyo 12 toddobaad, waxaa lagu talinayaa inaad ilmahaaga siiso saddex qiyaasood oo barastamool ah xitaa haddii uusan qandho qabin, 4 ilaa 6 saacadood gudahood (fiiri boggaga 14–17). Haddii ilmahaaga uu yeesho qandho ka dib qaadashada tallaalka da'ada 16 toddobaad, waxaad sidoo kale siin kartaa barastamool.

**Xasuusnow, waligaa daawooyin aspirin ku jirta ha siin carruurta ka yar 16 sano.**

**Isla markiiba wac dhakhtarka haddii ilmahaaga:**

- uu qabo heerkul aad u sarreeya (39°C ama ka badan);
- uu la kulmo qallal.

Haddii ilmahaaga uu la kulmo qallal, dhinac dhinac ugu jiifi meel ammaan ah sababtoo ah waxaa laga yaabaa in jirkooda uu ruxmo gariiro.



# Aqoonsiga 'meningitis' (caabuqa maskaxda) iyo 'septicaemia' (sumowga dhiigga)

Tallaallada MenB iyo qoorgooyaha (PCV) waxay ka hortaggaan noocyada kala duwan ee meningitis (caabuqa maskaxda) iyo septicaemia (sumowga dhiigga). Waxaa jira noocyo kale oo aan lahayn tallaallo sidaa darteed waa muhiim inaad weli ka digtoonaato calaamadaha iyo astaamaha.

'Meningitis' wuxuu sababi karaa barar ku dhaca xuubka maskaxda. Isla jeermisyadaas ayaa waxay sidoo kale sababi karaan sumowga dhiigga (septicaemia). Ilmo ama dhallaanka qaba caabuqa maskaxda (meningitis) ama summowga dhiigga (septicaemia) waxay aad u xanuunsan karaan saacado gudahood. Haddii aan la daaweyn, labada cudurba waxay noqon karaan kuwo dhimasho sababa. Astaamaha hore ee cudurka qoorgooyaha waa kuwo fudud waxayna la mid yihiin astaamaha hargabka iyo ifilada, sida heerkulka oo kordha (37.5°C iyo wixii ka sarreeya), walwalka, matagga iyo diidmada cuntada. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah astaamaha muhiimka ah ee ay tahay in laga digtoonaado ayaa hoos ku taxan.

**Ilmaha yaryar,** astaamaha ugu waawayn ee **meningitis** waxaa ka mid noqon kara:

- oohin cod dheer iyo taahin leh;
- xanaaq badan marka la qabto/qaado;
- qaybta jilicsan ee madaxa oo soo fuurta;
- dawakhsanaan iyo jawaab celin aad u yar - way adag in laga toosiyo hurdada;
- jilicsanaan iyo tabar la'aan ama ku adag dhaqdhaqaaqyada gariirinta ah;
- diiditaanka quudinta, matag;
- maqaar midab cirro leh, bararsan ama buluug isu beddelaya;
- suuxdin ama qallal;
- qandho;



astaamaha ugu waawayn ee **septicaemia** (summowga dhiigga) waxaa ka mid noqon kara:

- neefsasho degdeg ah ama qaabab neefsasho oo aan caadi ahayn;
- maqaar midab cirro leh, bararsan, ama buluug isu beddelaya;
- qandho ay gacmaha iyo cagaha ay qabow yihiin;
- qarqaryo;
- matag, diiditaanka quudinta;
- dhibco casaan ama guduud-xigeen ah oo aan ku baaba'ayn cadaadis (sameey tijaabada galaaska ee hoos lagu sharraxay) ;
- xanuun ama cuncun ka yimaada xanuunida muruqa ama xanuunitaanka addimada ama kala-goysyada jirka;
- tabar la'aan;
- hurdo badni aad u daran.

Waa muhiim in la xasuusto in qof walba uusan yeelan doonin dhammaan astaamaha la taxay. Haddii qofka uu yeesho qaar ka mid ah astaamaha la taxay, gaar ahaan dhibco casaan ama guduud-xigean ah, si degdeg ah u raadi caawimaad caafimaad. Haddii aadan la xiriiri karin dhakhtarkaaga, ama aad wali ka walwalsan tahay ka dib markaad hesho talo, ku kalsoonow dareenkaaga oo ilmahaaga u kaxeey waaxda gurmadka degdegga ah ee isbitaalka kuugu dhow.


**i**

**Haddii aad si adag muraayad/galaas ugu riixdo finan, finanka ma baaba'ayaan. Waxaad awoodi doontaa inaad finanka ka dhex aragto galaaska. Haddii ay taasi dhacdo, isla markiiba raadso caawimaad dhakhtar.**



Sawirka waxaa bixiyay Meningitis Now meningitisnow.org

**Waxaa laga yaabaa inay adkaato in finanka laga arko maqaarka madow ama buniga ah. Hubi meelaha cadcad sida calaacalaha gacanta ama dhanka hoose ee cagaha, saqafka afka, caloosha, qaybaha cadaanka ah ee indhaha ama gudaha indhaha.**



Sawirka waxaa bixiyay Meningitis Research Foundation meningitis.org

**Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caabuqa maskaxda (meningitis)?**

Hay'adaha Meningitis Research Foundation iyo Meningitis Now labaduba waxay bixiyaan
macluumaad ku saabsan caabuqa maskaxda (meningitis).

Wac lambarka khadka bilaashka ah ee Meningitis Now oo ah 0808 80 10 388 (9.00am-5.00pm Isniinta ilaa Jimcaha) ama booqo websaydka www.meningitisnow.org

Wac lambarka khadka bilaashka ah ee Meningitis Research Foundation oo ah 080 8800 3344 (9.00am-5.00pm Isniinta ilaa Jimcaha) ama booqo websaydka www.meningitis.org


Waxaad sidoo kale talo weydiin kartaa dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.





# Tallaalada la siiyo dhallaanka wax yar ka dib sanadguuradooda koowaad

Tallaalka loogu talagalay carruurta ka dib sanadguuradooda koowaad




Macluumaad ku saabsan tallaallada soo socda waxaa lagu bixiyay buug-yaraha *Tallaalada la siiyo dhallaanka wax yar ka dib sanadguuradooda koowaad*. Waxaa laguu soo diri doonaa buug-yarahan wax yar ka hor inta aan la gaarin wakhtigii uu ilmahaaga qaadan lahaa tallaalka ama ka eeg websaydka pha.site/vaccinations ama ha ka labalabeyn inaad weydiiso booqdahaaga caafimaadka.

## Tallaalka MMRV

MMRV wuxuu ilmahaaga ka difaacaa jadeecada (M), qaamo-qashiirka (M), jadeeco-jarmalka (R; jadeecada Jarmalka) iyo varicella (V; busbuska).

**Ilmahaaga waa inuu qaataa tallaalka MMRV wax yar ka dib sanadguuradiisa koowaad.**

Ilmahaaga wuxuu qaadan doonaa qiyaas labaad oo MMRV ah marka uu gaaro 18 bilood jir.

## Tallaalka 'Pneumococcal'

Tallaalkan waxaa horey loogu soo sharraxay bogga 11, ilmahaagana wuxuu u baahan yahay laba qiyaasood.

**Ilmahaaga wuxuu qaadan doonaa qiyaas kama dambays ah oo tallaalka 'pneumococcal' ah wax yar ka dib sanadguuradiisa koowaad.**

## Tallaalka MenB

Tallaalkan waxaa horey loogu soo sharraxay bogga 10, ilmahaagana wuxuu u baahan yahay saddex qiyaasood.

**Ilmahaagu wuxuu qaadan doonaa qiyaas kama dambays ah oo tallaalka MenB ah wax yar ka dib sanadguuradiisa koowaad.**

# Jadwalka tallaalada carruurnimada ee joogtada ah

Jadwalkani wuxuu waxyar ka duwanaan doonaa jadwalka loogu talagalay ilmaha dhashay ka hor 31 Diseembar 2024. Iskaan gareey QR koodhka ama booqo **nidirect.gov.uk/childhood-immunisation** si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

Tallaalka loogu talagalay carruurta ilaa hal sano jir ah





**8** toddobaad jir
- 6-in-1
- Rotavirus
- MenB

**12** toddobaad jir
- 6-in-1
- Rotavirus
- MenB

**16** toddobaad jir
- 6-in-1
- Pneumococcal

Tallaalka loogu talagalay carruurta ka dib sanadguuradooda koowaad




**1** sano jir (ka dib sanadguuradooda koowaad)
- MMRV
- MenB
- Pneumococcal

Tallaalka loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 18 bilood




**18** bilood
- 6-in-1
- MMRV




Ka ilaalinta ilmahaaga ifilada. Tallaalka loogu talagalay ilmahaaga yar ama ilmaha jira da'ada dugsiga xannaanada

**2+** sanno
- Tallaalka hargabka carruurta (sannadle ah)

Talaalka loogu talagalay carruurta jira da'ada dugsiga xannaanada, saddex sano iyo afar bilood jir




**3** sano iyo **4** bilood
- 4-in-1

**Haddii ilmahaaga uu seegay mid ka mid ah tallaalladan, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.** Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalladan, booqo **pha.site/vaccinations**

**6-in-1**
wuxuu ka difaacaa gawracatada, teetanada, xiiqdheerta (xiiq-dheer), cudurka dabeysha, Hib iyo cagaarshowga B

**4-in-1**
wuxuu ka difaacaa gawracatada, teetanada, xiiqdheerta (xiiq-dheer) iyo cudurka dabeysha



Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, booqo

pha.site/vaccinations

ama

www.nidirect.gov.uk/childhood-immunisation

Public Health Agency

**Public Health Agency**
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Find us on:

Daabacaaddan waxaa laga soo qaatay macluumaad asal ahaan ay soo saartay Hay'adda Amniga Caafimaadka ee UK waxaana lagu isticmaalaa Laysinka Furan ee Dowladda v 3.0

12/25